

# ATV

## Cusbooneysiinta Badbaadada: Ogaaw Sharciga Gobolka

Minnesota

## Waxa uu Ka Bilaabanaya 1-da Luulyo, 2025

## Shuruud Cusub oo Ku Saabsan Xirashada Suunka Badbaadada ee Wadayaasha ATV

**Dhammaan** wadayaasha iyo rakaabka ATV-ga Fasalka 2aad ee warshad ahaan loogu talagalay in lagu rakibo suumanka badbaadada **WAA IN AY XIRTAAN** suunka badbaadada mar kasta oo gaariga lagu wado ama lagu sugan yahay waddo dadweyne ama meel u dhow waddada. (Sharciga: Qodobka 169.686, Qaybta Hoosaadka 1)

## Maxaa Looga Baahan Yahay Dadka Raacaya?

### KOOFIYADA BADBAADADA

**ATV-yada Fasalka 1aad iyo Fasalka 2aad:**
Koofiyad uu ansixiyay Guddoomiyaha Badbaadada Dadweynaha ayaa looga baahan yahay **DHAMMAAN dadka raacaya** ee da'doodu ka yar tahay 18 sano, marka ay ku sugan yihiin dhul dadweyne, biyaha dadweynaha, ama hanti gaar ah.

### SUUMANKABADBAADADA

**Kaliya ATV-yada Fasalka 2aad:**
Haddii ATV-gu leeyahay suumamo badbaado oo warshad ahaan lagu rakibay, **DHAMMAAN wadayaasha iyo rakaabka** waa inay xirtaan marka lagu wado ama lagu sugan yahay waddo dadweyne ama meel u dhow waddada (right-of-way).

### ATV-yada Fasalka 1aad

**Ballac 50 inji ama ka yar**

### ATV-yada Fasalka 2aad

**Ballac Ka badan 50 inji balse aan ka badnayn 65 inji**

## Waa Maxay "Right-of-way"?

Wadista ATV-ga si toos ah loogu wado waddo dadweyne ama gudaha aagga sharci ahaan loogu aqoonsaday inuu qayb ka yahay waddada, kaas oo loo yaqaan ***right-of-way.*** TRight-of-way-gu wuxuu ka koobnaan karaa waddada lafteeda, garbaha jidka, jeexjeexyada biyaha, iyo marinnada lugeynta iyo wixii la mid ah.

## Dhaqan-gelinta & Ciqaabaha:

- Haddii aad tahay **15 jir ama ka weyn** oo aad jebiso sharciga, waxaa lagugu ganaaxi karaa **$25.**
- Haddii aad tahay wadaha gaariga, adiga ayaa mas'uul ka ah:
  - *Jebinta sharciga ee adiga kugu saabsan.*
  - *Jebinta sharciga ee uu sameeyo rakaab kasta oo ka yar 15 sano jir.*

**Waxaa lagugu ganaaxi karaa $25 jebinta sharci kasta oo aad samayso**

**KUWADSI XIKMADLEH! XIRO KOOFIYADDA. XIRO SUUMANKA.**

*Waa Sharci & Waxa Ay Badbaadin Kartaa Nolosha.*

MINNESOTA NETS BUCKLE UP

BuckleUpMN.org/off-road-vehicles